

OGAYSIIS DHAGAYSIGA DADWEYNAHA

ISBAHAYSIGA DEGMADA SAN DIEGO

ISTARAATIJIYADDA QORSHAHA SANADLAHA AH EE SANAD MAALIYADEEDKA 2024-25
DEEQDA HORUMARINTA BULSHADA, ISKAASHIYADA MAALGASHIGA GURYAHA,
FURSADAHA GURYAHA EE SHAKHSIYAADKA QABA BARNAAMIYADA DEEQDA
XALLINTA XAALADAHA DEGDEGGA AH IYO AIDS.

Waxaa halkaan lagu bixinayaa ogeysiis ah in Guddiga Kormeerayaashu ay qaban doonaan dhegeysi dadweyne markay tahay 9:00 a.m. OKtober 24, 2023, qolka 310 ee Xarunta Maamulka Degmada, 1600 Pacific Highway, San Diego, CA, dhagaysigaas oo ku saabsan Istaratiijiyadda Qorshaha sannadlaha ah ee Sannad Maaliyadeedka (FY) 2024-25.

Degmada San Diego waxay samaysaa Qorshe Sanadlaha ah sannad kasta si ay u aqoonsato mashaariic gaar ah oo la maalgelinayo inta lagu jiro sannad-maaliyadeedka soo socda, iyada oo loo marayo afarta barnaamij ee dawladda dhexe ee ay maamusho Hay'adda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada, Guriyeynta iyo Adeegyada Horumarinta Bulshada: Deeqaha Horumarinta Bulshada (CDBG), Iskaashiyada Maalgelinta Guryaha (HOME), Fursadaha Guriyeynta ee Dadka qaba AIDS-ka (HOPWA) iyo Deeqaha Xalinta Xaaladaha Degdegga ah (ESG). Istaratiijiyada Qorshaha Sanadlaha ah ayaa gacan ka geysan doonta hagidda horumarinta Qorshaha Sannadlaha ah.

Barnaamijyada CDBG iyo ESG waxay maalgaliyaan hawlaha guriyeynta iyo horumarinta bulshada ee Magaalooyinka Degmada oo ka kooban aagga aan la wadaagin iyo lix magaalo oo ka qeybqaadanaya barnaamijka (Coronado, Del Mar, Imperial Beach, Lemon Grove, Poway, iyo Solana Beach). Barnaamijka HOME wuxuu bixiyaa lacag/deeq loogu talagalay hawlaha guriyeynta ee isbaheysiga HOME oo ay ku jirto Magaalooyinka Degmada, iyo sidoo kale lixda magaalo ee Isbaheysiga (Carlsbad, Encinitas, La Mesa, San Marcos, Santee, iyo Vista). Barnaamijka HOPWA wuxuu u adeegaa dhammaan gobolka San Diego.

Qorshaha sannadlaha ah ee Sanad-maaliyadeedka 2024-25 waa in sanadka kasta loo buuxiyaa sannad kasta barnaamijyada CDBG, HOME, HOPWA iyo ESG ee degmada. Kahor intaan la samayn Qorshaha Sannadlaha ah, degmadu waxay qeexaysaa Istaratiijiyada Qorshe Sannadeedka kaas oo tilmaamaya mudnaanta iyo geedi-socodkyada maalgelinta sanadka soo socda. Dulucda Istaratiijiyada Qorshaha Sanadlaha ah ee sanadka hadda waxa si elektaroonig/online ah looga eegi karaa websaydka Adeegyada Horumarinta Bulshada: <https://www.sandiegocounty.gov/sdhcd/index.html>

Dadweynaha waxaa lagu martiqaadayaa inay ka soo qaybgalaan dhageysiga dadweynaha si ay faallooyin uga bixiyaan Istaratiijiyada Qorshaha Sannadlaha ah, iyo si loo helo fikradaha muwaadiniinta ee ku saabsan baahiyaha guriyeynta iyo horumarinta bulshada kahor intaan la diyaarin Qorshaha Sannadlaha ah ee sanad-dugsiyeedka 2024-25. Dadweynaha waxay sidoo kale bixin karaan faallooyin qoraal ah inta lagu jiro xilliga faallooyinka ee 14-ka maalmood ah ee dhammaanaya Oktober 24, 2023.

Faallooyinka qoraalka ah waa in lagu hagaajiyaa Hay'ada Adeegyada Guriyeynta iyo Horumarinta Bulshada, Qaybta Horumarinta Bulshada, 3989 Ruffin Road, San Diego, CA 92123, 858-694-8756, ama iimayl loo dirayo Community.Development@sdcounty.ca.gov. Dadka dhegaha la'a ama maqalka uu ku adag yahay waxay waaxda kala xiriiri karaan lambarka (866) 945-2207. Dadka u baahan in laga caawiyo ka qayb galka kulanka (aan Ingiriisiga ku hadlin, maqalkoodu culus yahay, iwm.) waa inay la xiriiraan shaqaalaha ugu yaraan shan maalmood kahor intaan la gaarin kulanka si ay u codsadaan wixii qabanqaabo gaar ah.